# aqaal: Ma Madaxweyne Xasan Sheekh Ayaa Doonaya Inuu Awood Ciidan Ku Qabsado Dalk

MAQAAL: Ma Madaxweyne Xasan Sheekh Ayaa Doonaya Inuu Awood Ciidan Ku Qabsado Dalka?

Warar isa soo taraya ayaa tilmaamaya in Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud lagu eedeeyay inuu adeegsanayo awood ciidan si uu dib ugu helo talada dalka, iyadoo laga walaacsan yahay qaababka loo adeegsado ciidamada qaranka iyo awoodda dowladeed.

Madaxweynaha ayaa xilalka ugu sareeya ee ciidamada ku wareejiyay saraakiil ka soo jeeda beesha uu ka dhashay, waxaana si gaar ah loola yaabay magacaabista wiilkiisa, Cabdifitaax Xasan Sheekh Maxamuud, oo loo magacaabay xil ciidan sare ah. Tani waxay dhalisay dhaleeceyn la xiriirta eex qabiil iyo kalsooni darro ka dhex abuurtay qeybaha kala duwan ee ciidamada iyo shacabka.

Sidoo kale, wararka qaar ayaa sheegaya in hubka dowladda loo wareejiyay ciidan beeleed cusub oo si gaar ah loo abaabulay, taasoo abuurtay walaac hor leh oo amni iyo mid siyaasadeed. Waxaa la rumeysan yahay in madaxweynaha uu qorsheynayo inuu doorashada ku wajaho si milatari ah, iyadoo la sheegayo in kooxo mucaarad ah ay durba bilaabeen dhaqdhaqaaqyo ciidan oo ka socda magaalada Muqdisho.

Intaas waxaa sii dheer, eedeymo la xiriira musuqmaasuq ayaa si xoog leh loogu jeedinayaa xafiiska madaxweynaha. Sida ay sheegayaan ilo xog ogaal ah, dhulal dowladeed ayaa lagu wareejiyay ganacsade lagu magacaabo Cabdinasiir Cali Adoon, oo lagu tuhunsan yahay inuu qeyb ka ahaa maalgelintii ololaha doorashada ee madaxweynaha.

Qandaraasyada dowladda, mashaariicda horumarinta iyo dakhliga canshuuraha ayaa lagu eedeeyay in loo xilsaaray dad qoys ahaan ugu dhaw madaxweynaha, taasoo dhaawac ku ah hufnaanta iyo kalsoonida shacabka.

Dhinaca kale, kooxda Al-Shabaab ayaa mar kale gacanta ku dhigtay qeybo muhiim ah oo ka mid ah gobollada Shabeellaha Dhexe iyo Shabeellaha Hoose, halkaasoo ciidamada dowladda laga saarayo si joogto ah. Amni darrada sii kordhaysa waxay abuurtay xaalad bini'aadamnimo oo aad u liidata, iyadoo malaayiin qof ay wajahayaan macluul iyo barakac.

Saxaafadda madaxa bannaan ee dalka ayaa wajahaysa caburin joogto ah – qaar ka mid ah wariyeyaasha ayaa la xiray, halka kuwa kale lagu qasbo iney qaataan lacag si aysan u daabicin warar ka dhan ah xukuumadda.

Gunaanad:

Haddii wararka kor ku xusan ay run noqdaan, waxay muujinayaan xaalad siyaasadeed iyo mid amni oo aad u liidata. Waxaa muhiim ah in madaxda dalka ay ka fogaadaan eexda, ku takri-falka awoodda, iyo ku ciyaarista awood ciidan si loo ilaaliyo kalsoonida shacabka iyo midnimada qaranka. Saxaafadda iyo ururrada bulshada rayidka ah waa in loo oggolaadaa iney si xor ah uga hadlaan arrimaha muhiimka u ah dalka, si ay u dhacdo isla xisaabtan dhab ah.